

UJEEDO: Warcusub oo ka yimid Boston Public Schools oo kusaabsan Nidaamka Galitaanka Imtixaanka Dugsiyada

Qoysaskayaga Qaaliga ahow,

Waad ku mahadsantihin dulqaadkiina guud ahaan nidaamka galitaanka imtixaanka Dugsiyada Boston ee sanadkan. Maxkamadu waxay soo saartay maanta go'aanka dacwada galitaanka imitixaanadka dugsiyada taas micnaheedu waxa weeyi Boston Public Schools (BPS) hada waxay sii wadi doonaan kumeelgaadh ah [Siyaasada galitaanka Imtixaanka Dugsiyada sida ay ansixiyeen Guddiga Dugsiyada Boston bishii Oktoobar 2020](#). Siyaasadan halka sano ah waxa loo sameeyay si looga jawaabo xanuunka dunida aafeeyay ee COVID-19 iyo caqabadihiisa maamulida galitaanka imtixaanaadka inta lagu gudo jiro dhacdooyinka caafimaad ee dugsiyada dawlada.

Waxaan ku guda jirnaa dhameystirka casumaadaha iskuulada waxaanan la shaqeyneynaa shuraakadeena dibada ee madaxa banaan si aan u hubino in xisaabaadkayagi ugu dambeeyay sax yihiin. Casuumadaha sadexda imtixaan ee dugsiyadu waxa lagugu soo diri doonaa iimayl iyo boosto joogto ah dhamaadka bisha Abriil isla marka ay shaqadu sidaa u dhamaato.

Waxaanu sii wadi doonaa inaan sii toos ah kuula soo socodsiino guud ahaan nidaamkan, oo aan sidoo kale kusiino wixii soo cusboonaada ee laga heli karo websaaytka BPS. Booqo www.bostonpublicschools.org/exam Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho. Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa Maria Vieira, Shaqooyinka Khabiirada Imtixaanka Dugsiyada, kawac 617-635-9512 ama exam@bostonpublicschools.org su'aal kasta.

Si naxariis leh,

Kusoo dhawoow adeegyada BPS